

Cilmi baadhista 2021-2022

Mudane/Marwo Waalid ama Mas'uul –

Cilmi baadhista taariikheedka fiicani way ka shishaysaa barista Google-ka. Ardaydu waa in ay bartaan wixii dhacay ka hor, intii lagu gudo jiray iyo wixii ka dambeeyay dhacdooyinka aasaasiga ah ee mawuucoda.

Ardaydu waxay heli doonaan noocyo ilo kala duwan ah oo ku xidhan mawduuca ay daraaseenayaan. History Day ardaydu waxay fiirin doonaan **macluumaad asal ahaan lagu soo bandhigay meelo kale**, sida bugaagta, boggaga internet-ka ama databases-ka. Ardaydu waxay sidoo kale ka eegi doonaan maadooyinka mudada wakhtiga mawduucoda oo loo yaqaano **macluumaadka aan meel hore lagu soo bandhigin**. Ilahani waxa ku jiri kara waraaqo, qoraallo maalimeedyo, sawirro, waraysiyo, ama wax ka badan.

Qayb ka mid ah cilmi baadhista waxa lagu samayn doonaa dugsiga dhexdiisa, laakin arday badani waxay ku shaqayn doonaan meel ka baxsan dugsiga.

Ka –Baxsan-Dugsiga	Gudaha-Dugsiga
<p>Ka qayb gal Hullabaloos Hullabaloos waa guryo cilmi baadhiseed oo furan oo ku yaalla maktabadaha dadwaynaha iyo maktabadaha machadka. Ardaydu waxay ka heli karaan caawimaad cilmi baadhiseed oo dheeraad ah, waxay la hadli karaan shaqaalaha History Day, ama waxay dhagaysan karaan casharro yar yar.</p> <p>Booqo boggayaga internet-ka markaad doonayso taariikho iyo goobo: www.mnhs.org/historyday/research/hullabaloos</p>	<p>Isticmaal linkiyada cilmi baadhista ee lagu kalsoonaan karo Ku dhiiri gali ardaygaaga in uu raadiyo ilaha aaminaadda leh.</p> <p>Ku bilow liiskayaga bilaabitaanka goobaha : www.mnhs.org/historyday/research/links</p> <p>Sidoo kale waa in aad booqataa Maktabadda Elekterooniga ah ee Minnesota: https://elibrarymn.org/</p>
<p>Booqo maktabad dadwayne oo maxalli ah Waxa ka jira maktabado dadwayne oo caawimaad leh iyo maktabiyaal Minnesota oo dhan.</p> <p>Halkan ka hel maktabaddaada maxalliga ah ee dadwaynaha: https://education.mn.gov/Maps/FindSch/</p>	<p>Raac hagahayaga cilmi baadhista Hagahayaga cilmi baadhista waxa uu ardayda la socdaa dhammaan qaybaha habka wax loo qabanayo. Waxaannu ka hadalnaa sida loo bilaabay, sida qoraallo loo sameeyo iyo socodka xigashooyinka.</p> <p>www.mnhs.org/historyday/research</p>

Waalidiinta iyo mas'uulka ilmuhu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan caawinta ardaydooda. Sikastaba ha ahaatee, waxa muhiim ah in aad xasuusnaato in mashruuca ay iska leeyihiin ardayga. Sidee ayaad u caawin kartaa?

- **Haa:** Bixinta gaadiidka gaynaya ama ka soo qaadaya maktabadaha
- **Haa:** Ka caawi inay tagaan maktabadaha ama ay qalabka ka helaan khaanadaha maktabadda
- **Haa:** Ka caawi ardayda in ay fahmaan qalabka, kaas oo laga yaabo in uu ka sarreeyo heerka akhriskooda
- **Maya:** U samee qoraalo ardayda
- **Maya:** U diyaari ama u samee waraysiyo

Waad ku mahadsantahay taageerada aad taageerayso ardaygaaga marka ay curinayaan mashruuc History Day ah! Waxaad History Day wax badan ka baran kartaa boggayaga internet-ka, www.mnhs.org/historyday.

Sammi Jo Papas

Sammi Jo Papas
Maamulaha Barnaamijka iyo Isuduwaha dawlad goboleedka
National History Day in Minnesota
samantha.papas@mnhs.org